



Cimilada. Masiibooyinka. Xaaladaha Degdega ee Iskuulka.

Dariiqooyinka aad kula xidhiidhi karto PPS

- Fariinta degdega ah: Iska diiwaangali School Messenger adigoo fariin degdeg ah u diraya oo oranaya YES lambarkani 68453
- Bogga PPS: www.pps.net iyo dhammaan boggaga iskuulada
- Twitter: @PPSConnect
- Facebook: www.facebook.com/pps.homepage
- Telefoon: Fariimaha is dira ee luqadaha la caawiyoo

CIMILIDU OO AAD U QABOWDO

Dugsiyada Dadweynaha Portland(PPS) maxay sameeyaan

Marka xaalada cimiladu ay ka dhigto mid aan si nabadgelyo laheyn iskuulka lagu tegi karin, Dugsiyada PPS waxa ay doortaan mid ka mid ah kuwan:

- Basasku waxay marayaan dariiqyada barafka
- Labo saacadood oo dugsiya dib loo dhigo waqtigii la bilaabayey
- Basaska oo mara dariiqyada barafka iyo labo saacadood oo dib dugsiya loo dhigo waqtigii la bilaabayey
- Iskuulku wuu xidhan yahay
- Iskuulada iyo xafiisyaduba way xidhan yihiin
- Iskuulka hore ayaa loo fasaxayaa

Sidee ayaad u ogaan kartaa

Dugsiyada Dadweynaha Portland(PPS) wuxuu isticmaalaa dhammaan dariiqooyinka lagula xidhiidhayo ka hor 6:30 subaxnimo, marka laga reebo marka xaaladaha cimiladu ay si tartiib ah isku bedeleyaan. *Ogsoonow: Dugsiyada PPS waxay bedeli doonaa fariimihii isdiri jiray marba sida fariinta degdeg ahi isticmaalkoodu u kordhaan.*

Sidee ayey Dugsiyada PPS go'aanka u qaataan

Mudnaantayada koowaad waa nabadgelyada. Dugsiyada Degmadu waxay la tashi la sameeyaan madaxda hawada saadaaliya, madaxda gaadiidka iyo shaqaalaha dugsiyada PPS ee tijaabiya xaaladaha jidadka. Mararka qaarkood xaaladuhu way isbedelaan ama qeybo ka mid ah magaaladu waa ay kala duwan yihiin.

MASIIBOYINKA:

DIYAARGAROWGA DHULGARIIRKA

Maxay Dugsiyada(PPS) sameeyaan

Marka ay timaado xaalad dhulgariir ahi. Ardayda waxaa la baray in ay:

- Madaxooga qariyaan, daboolaan ayna halkaa joogaan.
- Marka lagu amrana ka baxaan sida loo sheegay. Ardayda waa la xaadirin.
- Dhismaha ayaa lagu soo noqon haddii uu nabadgelyo yahay ama waxaa la isku urursan meeshii kale ee gudaha ama bannaanka ee la cayimo.

Tegitaanka guriga

Haddii khasaaruhu yahay mid fudud, baska iyo wixii kale ee gaadiid ahi waxay u sii shaqeyn sidii caadiga ahayd. Haddii khasaaruhu yahay mid culus, basasku ma shaqeyn doonaan, waana in waalidiintu caruurtooda dugsiya ka soo qaataan.

Sideed ku ogaaneysaa

Haddii nidaamyada isgaadhsiintu sii shaqeeyaan, Dugsiyada PPS waxay wargeli doonaan qoysaska sida ay ardaydu guriga ku iman doona. Haddii kale, waalidiinta waxaa laga rajeynayaa inay iskuulka yimaadaan oo ardayda ka qaadaan sida ugu degdeg badan ee suurtagal ah.

XAALADAH A DEGDEGA AH EE ISKUULKA

Maxay Dugsiyada PPS sameeyaan

Marka la tashi lala sameeyo ciidanka nabadgelyada ee booliiska, iskuuladu waxay isticmaali doonaa waxyaabahan soo socda:

Ka joojin: Khatartu waa bannaanka iskuulka(lada). Shaqaaluhu ardeyda ayay gudaha keeni, dhammaan iridaha laga soo galo dugsigana waa la xidhi, casharadii fasaladuna halkii ayey ka sii socon intaa iyo inta khatarta laga hadlayo.

Khatar gudaha ah: Khatartu waa gudaha iskuulka. Shaqaaluhuna dhammaan waxay xiri iridaha fasalada iyadoo ardaydu ay gabaad qaadan marba sida ay suurtagal u tahay.

Jawaabta Kooxda Joojinta Khatarta: Xaaladaha degdega ee caafimaadka ama dhacdooyinkii kale sida marka shaqaaluhu u baahdo in la gargaaro inta ay ardayda ka ilaalinayaan ineysan iman hoolasha. Alaabada(iridaha) fasalada waa la xidhi iyadoo fasaladuna ay sii wadanayaan hawlahooduu waxbarasho.

Daad-gureynta: ardeydu waxay mari dariiqyo loo cayimay; xaadirisna waa la sameyn si loo ogaado ardeyda wixii maqan iyo inta joogta.

Sida loo ogaado

Isgaarsiintu waa ay kala gedisan tahay xaaladaha:

- **Warbixin kooban ee dhacdada:** Iskuulku emailo ayuu u diri waalidiinta ama fariin ayuu raacin boorsooyinka dhabarka ee ardeyda marka dugsigu dhammaado maalintaas.
- **Waxaa loo baahan yahay in waalidku tallaabo qaado:** Sida ugu dhakhso badan ayaa fariin degdeg ah iyo/ama fariinta isdirta waalidiinta loo gaadhsiiin sida ay dhacdadu raad ugu yeelayneyso furitaanka iskuulka ama rawaxaada ama haddii ardaydu ay u baahan yihiin in iskuulka laga soo qaado.
- **Dhacdo dheeraatay:** Waxaa waalidka loo diri Fariin degdega ah/ ama fariinta isdirta xitaa haddii ayna u baahaneyn in ay tallaabo qaadan.

MAXAY QOYSASKU QABAN KARAAN

- Macluumaadka isdiwaangelinta ardayga ee xafiiska iskuulka:
 - Waxaad hubisaa in ay yihiin kuwa cusub telefoonada lagala soo xidhiidho waalidka xaaladaha degdega ah.
 - Liis garee dadka ay suurtagal tahay in ay u dhow yihiin iskuulka kuwaas oo ilmaahaga ka soo qaadi kara iskuulka haddii aanad ka soo qaadi karin adigu.
- Qorshee sidii aad u soo qaadi lahayd ilmahaaga haddii ay timaado xaalada degdeg ah, taasi oo ay ka mid tahay dhulgariir xun.
- Xusuusnow:
 - Dhacdooyinka sida badan qaarkood waxaa loo xaliyaa si degdeg ah marka ayna jirin khatar dhab ah wax yeelaya nabadgelyada ardayda. Fadlan ha iman iskuulka iyadoo ay jirto xaalad degdeg ah haddii aad lagu farin in aad timaado.
 - Dugsiyada Dadweynaha Portland(PPS) wax ay aqoonsan yihiin culeyska ay leedahay marka iskuulka dib u dhaco furitaankiisu ama la baajiyo sababo dhinaca cimilada ah ama dhacdooyinka kale iyadoo laga shaqeynayo sidii loo sameyn lahaa wacitaankii ugu nabadgelyo badnaa.

Wax badan waxaad ka ogaan kartaa halkan: www.pps.net , raadi wararka degdeg ah **“Get Urgent News”**